

Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska – Injirta Madaxa

Gacaliye Qoys:

Ilmahaagu waxa dhici karta inuu ka qaaday **injirta madaxa** Xarunta Head Start/ECEAP. Waa cayayaan yara madow oo leeg qudhaanta yaryar, kaasi oo quuta dhiiga madaxa.

Waa maxay astaamuhu? Cuncunka madaxa iyo/ama qoorta. Waxa ay tahay inaad raadiso waa wax yaryar oo cadcad oo kuuskuusan oo timaha kujira. Kuwani waa qandhicilka injirta soosaara. Waa wax yaryar oo qaabka ukunta ah oo cadcad kuwaasi oo aad ugaga dheggaan timaha meel u dhaw lafta madaxa. Waxay u muuqdaan toxob laakiin waxa suurogal ah inay ku bururaan farahaaga. Si aad u soosaarto waa inaad ku dabto farahaaga dhexdooda oo aad hoos ugu raaracdo tinta.

Sidee ayey ku faaftaa? Taabashada tooska ah ee timaha qofka xanuusan. Wadaagista gafeedha, cadayga, koofiyadda, bustaha, ama go'a. Meel kuwada kaydinta shayada wasakhaysan iyo kuwa nadiifta ah.

Goorma ayey astaamuhu bilaabmaan? 1-5 maalmood kadib la kulanka qofka xanuusan ama shayga wasakhaysan.

Ma loo baahan yahay ilmaha in guriga lagu hayo? Haa, ilaa daawayntu dhammaato oo dhammaan qandhicilka laga saaro tinta.

Haddii aad tuhunsan tahay ilmahaagu inuu injir leeyahay, wac bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga si aad talo uga hesho daawaynta ogaysiinaya macalinka ilmahaaga ee Head Start/ECEAP. Fadlan u hubi ilmahaaga si toddobaadle ah muddo bil ah. Gaar ahaan si taxadar leh u eeg meelaha ka dambeeya iyo ka sarreeya dhaghiisa iyo qoorta dambe.

Shaqaalaha: _____ Taleefanka: _____

Xarunta: _____